

Somali – juin 2012

Faa'iidaa ku jirta ee qashinka kala sooca

Kaddib markii canshuur lagu soo rogay bacda qashinka bilawgii bisha 1aad ee 2012, fogaynta iyo gubista qashinka waxaa idiinka bixi doona dhaqaale ku xiran inta qashinkiinu le-eg yahay. Hoos waxaad ka heli doontaan talooyin iyo farsamo idinka kaalmaynaya sidii aad qashinkiina u yarayn lahaydeen

Compost



cunto oo idil, bisayl ama ceeriin waxay gelayaan qashinka loo yaqaan compost: Sidoo kale qolfaha ukunta, khasharka bunka iyo shaaha, ubaxa, dooggaa, geedka ciidda masiixiga, qashinka beerta, kashkaashka xayawaanka guri joogta ah(sida balka, cawska iyo haraaga alwaaxa). Lagu dari maayo hilibka iyo cuntada hilib ku jiro, kalluunka iyo qashinkiisa.

Waraaqaha



Waxaa soo gelaya nooc kasta oo waraaqo ah, aan ka ahayn waraaqaha wasakhda ah sida: waraaqaha lagu duufsaday, kuwa musquusha loo isticmaalay, kuwa jikakada loo isticmaalay, kuwa cunto lagu duubay. Baakadaha gooni ayaa loo saarayaa.

Betteriga, nalalka iyo daawooyinka



batteriga iyo nalalka waxaa la geynayaa goobaha ganacsiga ee lagu iibiyo, dawooyinkana waxaa loo geynayaa farmashiyaha.

Caagadaha PET



Waa laysku jebinaya oo hawada laga saarayaa kadibna furkoodaa lagu xirayaa, dabadeedna waxaa la geynayaa goboha ganacsiga ama haamaha loogu talagalay.

Dhalooyinka



Dhalooyinka nooc kasta ay yihiin waxaa la geynayaa haamaha qashin qubka, dhalo kastana waxaa lagu ridayaa gudka midabkeeda ku aadan(caddaan, cagaar, huruud)

Aluminium-ka, biraha



Tubooyinka, daasadaha, alluminium-ka, daboolka Yoogur-ka, haddayxitaa wasaq yihiin dib ayaa loo isticmaalayaa oo waxaa la geynayaa goobaha qashinka.

Dharka



Iyagoo nadiif ah ayaa waxaa lagu aruurinayaan bacaha loogu tala galay oo mar kasta. Lagu soo rido santuukha Boostada, kaddibna waxaa la geynayaan haamaha loogu tala galay. Ama banaanka ayaa la dhigayaa taariikhda aruuriinta oo ku qoran bacda dusheeda.

Qashin khaas ah



Wixii rinji ah ama kimika ah (loo adeegsado farsamaynta alaabta) waxaa dib loogu celinayaan goobtii ganacsii ee laga soo iibsaday ama mid ka mid ah **6 xarumo goboleed** oo loogu tala galay in lagu aruuriyo qashinka khaaska ah eeg: www.ne.ch/dechets sous: spéciaux des ménages.

Qashinka xaggee baa la geynayaan ?

Waraaqahabaa, kadaha, caagadaha PET ah, dhalooyinka, alluminium-ka, saliidda, dharka, biraha waxaa la geynayaan **haamaha loo diyaariyey ee meelaha qashin qubka**.

Wixii makiinad ah, qalabka caruurtu ku ciyarto,, qalab koronto, qalab elektronik, batteri, nal waxaa la geynayaan **goobaha ganacsiga**.

Wax kasta oo wax lagu naddifiyo, kimikada alaabta lagu farsamaysto waxaa la geynayaan **xarumaha qashinka khaaska ah**.

buubeelka ayaa lagu ridayaa



Wixii qashin ah ee soo haray (caagadaha, bacaha wax lagu duubto ama lagu rito, wixii kaloo caag ah, baakadaha casiirka, bacda asbiiratoorka, qashinka bisadaha loo goglo, waraaqaha wasakhda leh)

Bacda qashinku waa canshuuran tahay

Waxaa la oggol yahay bacda rasmiga ah oo keliya, magaceedana la yiraahdo Neva oo qiimaheedu yahay 1.- CHF 17ka litir, 2.- CHF 35ta litir, 3.40.- CHF 60ka litir, 6.30.- CHF 110ka litir. Bacaha waxaa lagu iibiyaa dukaamaha caadiga ah.

Xog intaas ka badan

Magaalada Neuchatel: <http://www.2000neu.ch>

Magaalada La Chaux-de-Fonds: <http://www.letri.ch>

Magaalada du Locle: <http://www.lelocle.ch>

Magaalooyinka kale la xiir xarunta Degmada.

Gobolka Neuchâtel: <http://www.ne.ch/environnement/dechets>

Val-de-Travers/La Côte-aux-Fées/ Les Verrières et La Brévine

Kala saaridda qashinku waa isku nooc, hase yeeshiin canshuurta la qaadayo waxay ku xiran tahay miisaanka bacda buubeelka. Xog intaas ka badan kala xiriir xafiiska tirakoobka dadka (032/886 43 00) ama gal sidka : www.val-de-travers.ch.